

# CIID WANNAAGSANN

“  
SI AY UGALA QAYBQAADATO FARXADDA, AYAA  
ARC AY DHAR CIIDEED U QAYBISAY AGOONTA  
“

“





## SI AAD U AKHRIDO FAAHFAAHINTA WARKA, GUJI CINWAANKA



03



**Mashaariicda  
biyaha iyo  
Fayadhowrka  
deegaanka**



05



**Adeegyada Iyo  
Hawlaha Samafal  
Ee Caafimaadka**



07



**Mashaariicda  
Waxbarashada**



14



**Aqoon & Ogaal**



**Address:** Barbera Road - Hargeisa  
**Mobile:** +252633278256  
**Phone:** +252514333  
**Website:** www.arcsom.org

**مسارات  
خيرية** CHARITABLE  
PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO HAY,ADDA  
GARGAARKA AFRICA (A.R.C) AY KAGA  
WARRANTO MASHAARIICDEEDA  
HORUMARINEED IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (20) APRIL 2023



**MASHAARIICDA BIYAHA IYO FAYADHOWRKA DEEGAANKA****ARC Ayaa Hirgelisay Ceel Biyood Ay Ka Faa'idaysan Karaan  
3 Kun Oo Muwaadin**

Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa ceel biyood riig ah ka qodday deegaanka Dacar Budhuq ee gobalka Maroodi-jeex ,Hargeysa Somaliland.

Ceelkan oo hoos loo qoday 40 Mitir, waxaa ku lammaan dab-dhaliye biyaha ka soo tuuraya, barkad kayd ah oo qaadaysa illaa 10 kun oo litir, 5 qasabadood oo ay dadku ka dhaansanayaan, iyo sidao o kale darar ay ka cabbayaan Xoolaha kala duwan ee deegaanku.

Ceelkan oo dabooli kara baahida biyood ee in ka badan 500 oo qoys oo lagu qiyaasayo in ay wadartoodu tahay illaa 3 kun oo qof, waxaa maalgeliyey samafalaya-

al u dhashay dalka Kuweyt oo waqaf uga dhigay Marxuum Cabdilladiif Bin Ciise iyo dhaxleyaashiisa.

Hirgelinta ceelkani waxa ay qayb ka tahay mashaariicda biyaha ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee Geeska Afrika, iyada oo maalgelin ka helaysa samafalayaal u dhashay dalka Kuweyt. Waxa aanay ujeeddadiisu tahay in kaalin laga qaato daboolista baahiyaha biyood ee dadka saaboolka ah, si loo yareeyo khataraha nolo-lead iyo caafimaad ee biyo la'aanta ama biyaha aan nadiifta ahayn, kuwaas oo si gaar ah u kordha xilliyada abaaraha.



## ARC Ayaa (3) Ceel Ka Qodday Soomaaliya



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa saddex ceelbiyood ka qodday gobalka Shabeelaha hoose ee Koonfurta Soomaaliya. Ceelashan oo leh dabool iyo qolfoof sabbad ah, waxaa ku lammaan, qalabka biyo soosaarka, goob ay dadku ka cabbayaan iyo darar loogu talagalay in xoolaha laga waraabiyo. Waxa aanay ku filanyihiin baahida biyood ee in ka badan 150 qoys, kuwaas oo wadartooda celcelis ahaan lagu qiyaasi karo illaa 900 oo ruux. Qodaalka iyo diyaarinta ceelasha ayaa ka mid ah masha-

ariicda biyaha ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaannada iyo magaalooyinka Soomaalida ee dhaca gobalka Geeska Afrika, iyada oo maalgelin ka helaysa samafalayaal reer Kuweyt ah. Mashaariicdan waxa ay ujeeddadoodu tahay in gacan laga geysto dadaallada lagu yaraynayo baahida biyood ee qoysaska saboolka ah iyo xoolahooda haysta, gaar ahaan xilliyada abaaraha oo aanay muwaadiniin badani helin biyo caafimaad ahaan ku habboon cabbitaanka.



## ADEEGYADA IYO HAWLAHA SAMAFAL EE CAAFIMAADKA

## ARC Oo Fulisay Qalliino Indhaha Oo Bilaash Ah



Dhakhaatiirta takhasuska indhaha ee cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa ayaa qalliino iyo daweyn indhaha ah u sameeyey 11 bukaan ah. Tallaabadan ayaa qayb ka ahayd ololeyaasha gargaarka caafimaad ee ay hay'adda Gargaarka Afrika ka fuliso deegaannada Soomaalida, iyada oo gacan dhaqaale ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt. Waxaana looga faa'ideeyaa bukaanka aan awoodi karin in ay iska bixiyaan kharashaadka Daweynta iyo qalliinada oo indhuhu ka mid yihiin.

Dr. Yaasir Darwiish, maamulaha cisbitaalka caalamiga ah ee Hargeysa - HIH ayaa sheegay in Cisbitaal ahaan ay ku faraxsan yihiin ka qaybgalka mashruucan, "Faan ayaa ay noo tahay in aannu qayb ka noqonno hawsha daryeelkan caafimaad ee muhiimka ah lagu siinayo bukaanka saboolka ah

ee magaalada Hargeysa" ayaa uu yidhi Dr. Yaasir, isaga oo intaas ku sii daray in mar kasta ay dadaal ugu jiraan sidii adeegyada caafimaad ee lagama maarmaanka ah loo gaadhsiin lahaa dadka aan awoodin in ay iska bixiyaan kharashaadka caafimaadka, gaar ahaanna caafimaadka indhaha.

Dr. Yaasir oo faahfaahin dheeraad ah ka bixiyey ololahan oo ka dhacay xarunta cisbitaalka ayaa sheegay in uu ka koobnaa qalliin iyo daweyn, dhammaantood lacag la'aan loogu qabtay bukaankan. Qaar ka mid ah bukaanka adeegyadan caafimaad loo qabtay oo iyaguna goobta kula hadlay qaar ka mid ah masuuliyiinta hay'adda iyo cisbitaalka ayaa ka mahadsheegtay shaqada loo qabtay, waxa aanay bogaadiyeen dhakhaatiirta hawshooda gacanta ku haystay.



## Qalliino xoqadaha lagaga jaray (10) bukaan ah oo Hargeysa laga fuliyey



Dhakhaatiirta qaybta takhasuska Dhegaha, sanko iyo cunaha ee ENT loo yaqaanno ee cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa - HIH ayaa 11 bukaan ah ku sameeyey qalliin ay xoqadaha kaga jarayeen. Qalliinada xoqado jariddu waxa ay ka mid yihiin hababka ugu muhiimsan ee lagu daweyyo bukaan qaba dhibaatooyinka dhinaca cunaha ah iyo caabuqa soo noqnoqda ee xoqadaha.

Dr. Ismaaciil Rifcat oo ka mid ah dhakhaatiirta takhasuska ah ee qalliinkan samaysay ayaa ka warramay dhibaatooyinka ka dhalan kara xoqado xanuunka haddii aan la daweyn, "Waxa ay sababaan caabuq iyo bukaan aan loo maaro helin oo kaar badan leh, isla markaana dhantaala tayada caafimaad ee qofka" Digtoorka oo sii wada hadalkiisa ayaa dhinaca kalana, ka warramay qaabka loo maray qalliinada lagu sameeyey bukaan (10) ka ahaa, isaga oo sheegay in marka hore loo sameeyey shaybaadhistii waajibka ahayd qalliinka ka hor, kaddibna lagu sameeyey qiimayn dhakhtar si loo

ogaado in baahida qalliinkani jirto, taas oo ay ka soo baxeen in 11 kan bukaan ahi ay u baahan yihiin in laga jaro xoqadaha. Dr. Ismaaciil Rifcat waxa uu sheegay in ay guulaysteen dhammaan qalliinadaasi, bukaankiina weli loo wado daryeelkii ay u baahnaayeen iyo la socoshadii dhakhtarka ee qalliinka kaddib.

Qaar ka mid ah bukaan qalliinka loo sameeyey ayaa ka mahadnaqay samafalka caafimaad ee ay hay'adda ARC gaadhsiiyay, waxa aanay bogaadiyeen dhakhaatiirtii dadaalka gelisay qalliinkan, iyaga oo dhinaca kalana sheegay in caafimaadkoodu uu ka soo raynayo, maadaama oo ay weli ku jireen xaaladdii ka sii kabashada qalliinka.

Qalliinkani waxa uu ka mid yahay olo-loyaasha samafalka caafimaad ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida, iyada oo kaalmo dhaqaale ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.





## MASHAARIICDA WAXBARASHADA

### ARC ayaa ciidsiisay (300) oo Agoon ah



Mashruuca kafaalaqaadka iyo daryeelka agoonta ee hay'adda Gargaarka Afrika ayaa dharka Ciidda u qaybiyey carruurta agoonta ah lagu daryeelo xarumaha hay'addu ku leedahay magaalooyinka Hargeysa, Somaliland iyo Garoowe - dawlad-gobaleedka Puntland ee Soomaaliya.

Carruur wadartoodu gaadhayso (300) oo isugu jira wiilal iyo gabdho, ayaa la gaadhsiiyey dhar iyo kabo loogu talagalay in ay muslimiinta kagala qaybqaataan damaas-

haadka maalinta Ciidda soonfur. Mashruuca ciidsiinta agoonta oo ay hay'adda ARC fuliso sannad kasta, waxaa maalgeliyey hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo xarunteedu tahay dalka Kuweyt. Waxa aannay ujeeddadiisu tahay in kaalin laga qaato daboolista baahiyaha daran ee agoonta haysta, iyo in la wanaajiyo duruufahooda nololeed iyo bulsho, laguna abuurto reynreyn ay maalintan oo kale dadka kala qaybgalaan farxadda iyo damaashaadka Ciidda.



## Dharka Ciidda Oo Loo Qaybiyey Agoonta Xarunta Al-Xannaan Ee Burco



Guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa booqasho u kuurgelis ah ku tegey xarunta waxbarashada Al-xannaan ee magaalada Burco. Muddadii uu guddoomiye Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi ku sugnaa xarunta Alxannaan waxa uu goobjoog u ahaa dharka Ciidda oo loo qaybiyey carruurta agoonta ah ee lagu daryeelo xarunta oo tiradoodu 90 tahay. Mashruucan ciidsiinta agoonta waxaa maalgeliyey mudane Faysal Almarsuqi oo ah samafale u dhashay dalka Qatar.

Booqashada guddoomiyaha ayaa qayb ka ah dadaallada ay hay'addu doonayso in ay kaga jawaabto

baahiyaha bulshada, iyo in ay farxadda ciidda la qaybsato carruurta agoonta ah ee ay daryeelkooda gacanta ku hayso.

Xarunta waxbarashada ee Alxannaan waxa ay ka mid tahay xarumaha waxbarashada iyo daryeelka agoonta ee ay gacanta ku hayso hay'adda gargaarka Afrika - ARC, waxaana dhismihiisa hore maalgeliyey marwo Xisat Al-Ibraahim oo ah samafale u dhalatay dalka Kuwait.





## Guddoomiyaha ARC Oo Booqasho Shaqo Ku Tegey Jigjiga



Maamulaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa booqasho shaqo ku tegey magaalada Jigjiga ee caasimadda dawlad deegaanka Soomaalida. Guddoomiyaha ayaa goobjoog ka noqday qaybinta (300) oo xidhmo oo ahaa raashin ay hay'addu bishii Ramadaan u qaybisay qoysaska saboolka ah ee deegaanka, kaas oo ay maalgelisay hay'adda caalamiga ah ee Al-khayriya Al-Islaamiya.

Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi intii uu booqashada ku joogay Jigjiga waxa uu u kuurgalay dadaallada ay hay'adda ARC kaga jawaabayso baahiyaha bulshada saboolka ah, gaar ahaan muddada lagu jiro bisha barakaysan ee Soon. Waxa aanay ka turjumaysaa muhiimad-

da hawlaha samafal ee hay'addu waddaa ay u leeyihiin caawinta dadka baahida u qaba.

Qaybo ka mid ah bulshada ka faa'idaysatay Barnaamijka cunto qaybinta ee Ramadaan-ta oo uu guddoomiyuhu kula kulmay goobaha shaqada ka socotay ayaa bogaadinayey hawlaha samafal ee ay hay'adda ARC ka waddo deegaannadooda, iyaga oo sheegay in ay ku faraxsanyihiin kaalinta ay hay'addu ka qaadatay farxadgelinta iyo fududaynta culayska dhaqaale ee saarnaa, xilli lagu jiro bisha fadliga badan ee Ramadaan.

Booqashada guddoomiyaha waxa kale oo ay daaranayd in la xoojiyo xidhiidhka ka dhexeeya bulshada loo shaqaynayd iyo hay'adda.



## Lo' Dhaqasho Ah Oo Loo Qaybiyey Qoysas Sabool Ah Oo Ku Nool Jigjiga



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa lo' irmaan oo lammaan u qaybisay qoysas sabool ah oo deggen magaalada Jigjiga, xarunta dawlad deegaanka Soomaalida. Lo'dan oo maqasheeda wadata ayaa loogu talagay dhaqasho, si ay il dhaqaale iyo cunto ugu noqoto qoysaskan. Iyaga oo ka faa'idaysan doona caanaheeda, subaggeeda iyo wixii taran ah ee Alle ku kordhiyo.

Qoysaska la siiyey lo'dan ayaa hawladeenna da ARC u sheegay muhiimadda ay u leedahay



noloshooda iyo rejada wanaagsan ee ay ku qaaban in ay kaalin ka geysan doonto wanaajinta duruufahooda dhaqaale.

Qaybinta Xoolaha dhaqashada ahi waxa ay qayb ka yihiin mashruuca 'Xoogsi Xalaal ah' oo ay hay'adda Gargaarka Afrika kaga qaybqaadato kaalmaynta nololsha qofka iyo bulshada guud ahaan, iyo gacan ka geysashada koboca iyo horumara dhaqaale maadaama oo laga filayo in uu u noqdo il dhaqaale oo jiritaankeedu joogto noqon karo.

## Miisaska Ganacsiga Cuntada Oo Loo Qaybiyey Dad Danyar Ah



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa gaadhi-gacanno miisas wax lagu dul iibiyo ah u qaybisay saddex ka mid ah ganacsatada yaryar ee dhibaataadu ka soo gaadhay dabkii sannadkii hore ka kacay Suuqa Waaheen.

Gaadhi gacannadan oo u diyaarsan qaab miisas lagu dul iibiyo ayaa ay ganacsatadani uga faa'idaysan doontaa iibka dharka oo ay ka shaqaystaan. Waxa aanu qayb ka yahay mashruuca 'Xoogsi Xalaal ah', kaas oo ay ujeeddadiisu tahay in ka faa'idaystayaasha lagu dhiirrigeliyo in ay yeeraan shaqo u gaar ah oo ay kala



soo bixi karaan noloshooda, isla markaana kaga qayb qaadan karaan koboca dhaqaale ee dalka. Hay'adda ARC ayaa mashruucan ka fuliso Somaliland iyo guud ahaan dhulka Soomaalida ee Geeska Afrika, iyada oo gacan maaliyadeed ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo fadhigeedu yahay dalka Kuweyt. Waxaa inta badan mashruucan looga faa'ideeyaa bulshadu sida ay u sii kala baahi badantahay, waxaana miisaska gaadhi gacanka ah ee la qaybiyo la socda badeecadda iibka ee bar Bilowga u noqonaysa ganacsiga.

## Afur Wadareed Kulmiyey Shaqaale Weynaha Hay'adda ARC Ee Hargeysa



Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa afur wadareed isugu keentay hawlwadeennadeeda kala duwan ee ku sugan magaalada Hargeysa. Afurkan oo ka qabsoomay xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa, waxa uu qayb ka ahaa dadaallada ay hay'addu ku xoojinayso isku xidhnaanta bulsho iyo iskaashiga hawlwadeennada heerarka kala duwan, iyada oo aaminsan in ay taasi qayb laxaad leh ka qaadanayso koboca iyo horusocodka hay'adda.

Munaasabaddan waxa ay hay'addu ku soo martiqaaday Sheekh Mustafe Xaaji Ismaaciil Haaruun oo ka mid ah culimada waaweyn ee Soomaalida, waxa aanu jeediyey hadal waano iyo wax sheegmo ah oo uu kaga hadlay Soonka iyo muhiimadda cibaado ee ay bisha soon u leedahay Muslimiinta.

Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi, guddoomiyaha hay'adda ARC oo isaguna hadal ka jeediyey munaasabaddan afur wadareedka ahayd ayaa ka hadlay, muhiimadda ay leedahay xoojinta ruuxda iskaashiga bulsho ee hawlwadeennada ARC, iyo faa'idooyinka ay shaqo wadareedka iyo iskaashigu u leeyihiin dadaallada lagu

rumaynayo yoolashada hay'adda, iyo horumarkeeda. Waxa hadalladiisa ka mid ahaa, "In la dhiso wadar shaqo oo xooggan isuna dhammaystirani, waxa ay u baahantahay in la helo isku xidhnaan bulsho iyo u abtirsashada hay'adda oo la xoojiyo. Taas oo caawinaysa in yoolashada hay'adda loo rumeeyo si ka sii wa-naagsan kana sii waxtar badan."

Dr. Mucallimi waxa uu sheegay in afur wadareedkani uu ka turjumayo xurmada iyo muhiimadda ay hay'addu siinayso hawlwadeennadeeda, iyo in ay xoojinayso ruuxda iskaashiga u dhexeeya shaqaalaha kala duwan iyo masuuliyiintoodaba.

Hawlwadeennada munaasabadda soo xaadi-ray ayaa iyaguna bogaadiyey isu imaanshiyaha noocan ah, iyaga oo ku tilmaamay dhiirrigelin iyo in ay muhiim u tahay xidhiidhka wada shaqayneed iyo iskaashi.

Waxaa xusid mudan in afur wadareedkani uu qayb ka yahay barnaamijyada ay hay'addu ku xoojiso qiyamka Islaamiga ah ee deegaanka shaqo, iyo ruuxda togan ee iskaashiga iyo wadajirka shaqaale weynaha hay'adda.



## Xarunta Kuweytiga ayaa looga dabbaladegay munaasabadda Ciidda



Xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa ayaa lagu qabtay munaasabadda farxadda maalinta Ciidda soonfur, waxaana ka soo qaybgalay tiro ka mid ah jaaliyadaha carbeed ee ku dhaqan deegaanka kuwaas oo dhammaantood salaadda Ciidda ku tukaday xarunta. Munaasabaddan damaashaadka waxaa qayb ka ahaa kulanno iyo waanooyin diini ah.

Khadiibka salaadda ayaa ka warramay muhiimadda ay leedahay in qofka muslimka ahi aqoonsado in uu Alle addoon u yahay, kuna dhaqmo amarradiisa, waxa kale oo uu tilmaamay in qofka oo ka mahadceliya nimcooyinka uu Alle qofka siiyaa ay ka mid tahay cibaadda laga rabo muuminka. Dhinaca kalana waxa uu Sheekhu tilmaamay in muhiimadda bulsho ee ay leedahay maalinta Ciiddu, iyo in ay tahay maalin mahadnaq, iyo qiritaanka weynida Alle iyo in dhammaanteen aynu adoomihiisa nahay. Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi, guddoomiyaha hay'adda ARC oo isaguna munaasabadda ka hadlay ayaa sheegay muhiimadda ay leedahay xuska maalintan oo kale, iyo in ay ka

turjumayso ruuxda togan ee muslimka, xoojinaysana xidhiidhka iyo isbarashada jaaliyadaha carbeed ee ku dhaqan dalka. Waxaana hadalladiisa ka mid ahaa in "Munaasabaddan waxa loogu talagalay xoojitna xidhiidhada bulsho ee dadyowga kala duwan, waxa aanay ka qaybqaadanaysaa muujinta qiyamka wanaagsan iyo muhiimadda kulanka dhaqannada kala duwani u leeyahay bulshada" Isaga oo intaas ku daray in hay'ad ahaan ay ku faraxsanyihiin ka qaybgalka damaashaadka ciidda ee ay isugu yimaaddeen jaaliyadaha kala duwani, taas oo xoojinaysa wada noolaanshiyaha bulshada. Guddoomiyaha Mucallimi waxa uu bogaadiyey ka soo qaybgalayaasha munaasabaddan diiniga ah, waxa aanu hoosta ka xariiqay in ay xoojinayso iskaashiga iyo isku tiirsiga muslimiinta, isla markaana xoojinayso qiyamka wanaagsan ee bulshada.

Waxaa xusid mudan in xarunta Kuweytigu oo ka mid ah hormuudka waxbarasho ee dalku, ay hoostagto hay'adda Gargaarka Afrika - ARC oo xarunteedu tahay magaalada Hargeysa.



## AQOON &amp; OGAAL

Talooyin caafimaad  
oo muhiim ah

1. Waxa ay dhakhaatiirtu ku taliyaan in la joogteeyo cabbitaanka shaaha cagaaran, koob maalin kasta. Waxaa ku jira maaddooyin lid ku ah mariidka jidhka ku jira, kaas oo haddii jidhka laga ilaaliyo ka hortag fiican u noqon kara xanuunka kansarka.
2. Cunitaanka kalluunku waxa ay kobcisaa heerka maaddooyinka 'Phosphorus' iyo 'Iodine' ee jidhka, taasina waxa ay xoojisaa Lafaha, waxa aanay ilaalisaa caafimaadka maskaxda, iyada oo sida oo kala-na Wadnaha ka ilaalisa Xanuunnada kala duwan.
3. Waa in lagu dadaalo in jidhku uu helo nasasho, waqti uu daalka iyo diifta ka soo kabto iyo waqti u

- fiirsi iyo fikir keliya uu galo, waxa ay ka caawinaysaa in uu mar kale dib u soo ceshado firfircoonida.
4. Dhakhaatiirtu waxa ay ku taliyaan in lagu dadaalo marashada kareemada / dhaashiga fallaadhaha qorraxda jidhka ka ilaaliya, gaar ahaan marka meel qorrax leh la joogo waxa ay jidhka ka ilaaliyaan dhibaatooyinka caafimaad darro ee maqaarka ku iman kara.
5. Marka aad fadhiisanayso u fadhiiso si qumman, iskana jir qallooca si aad u ilaaliso caafimaadka laf dhabartaada. Waxa kale oo muhiim ah in aad iska jirto qaadista miisaanka aad u culus.

## Muhiimadda ay leedahay in shaqaaluhu ay lexe jecleeyaan hay'adda

In shaqaaluhu uu lexejeclu u hayo hay'adda ama goobta uu ka shaqaynayo, iskuna tiriyo in aan laga lahayni, waxa ay si weyn uga qaybqaadataa guusha hay'adda ama shirkada iyo waaritaanka jiritaankeeda. Arrintani waxa ay si gaar ah ugu sii fiican tahay hay'adaha ka shaqeeya hawlaha samafalka oo xiisaha shaqaaluhu u qabaan shaqada ay udub dhexaad u tahay gaadhista yoolashooda samafal, iyo ka midha dhalinta himilooyinkooda. Waayo lexejeclada iyo raalli ahaanshiyaha shaqaaluhu waxa ay dhiirrigelisaa in ay shaqada joogto ku noqdaan, taas oo iyaduna raad togan ku yeelanaysa waxsoosaarkooda iyo tayada shaqadooda.

Hay'adaha samafalka ee ku baraarugsan arrintani, waxa ay dadaal badan geliyaan xoojinta lexejeclada shaqaalaheedu u hayaan iyo dareenka lahaanshiyo ee ay u qabaan hay'adda, si ay taasi u timaaddana waxa ay hay'addu abuurtaa jawi dhiirrigelinaya

shaqada oo uu shaqaaluhu nafis ku dareemo. Waxa kale oo ay muhiimad siiyaan horumarinta iyo kobcinta tayada iyo aqoonta shaqaalaha; waxaa ka mid ah tababarro horumarineed oo shaqadooda ku aaddan, iyo in ay siiyaan abaalmarinno iyo dallacsiino ku habboon oo dhiirrigeliya.

Mar kasta oo uu qofka shaqaalaha ahi dareemo xurmaysn iyo in waxqabadkiisa la aqoonsanyahay, waxa ay noqotaa dhiirrigelin sii dardargelisa waxqabadkiisa. Lexejeclada iyo dareenka lahaanshiyo ee shaqaalaha hay'adda samafalka waxa kale oo uu lagama maarmaan u yahay xidhiidh wax ku ool ah oo dhex mara maamulka iyo hawladeennada, iyo in la dhegeysto baahiyahooda iyo dhibaatooyinka ay sheeganayaan, lana siiyo taageerada iyo kaalmada suurtagalka ah ee ku habboon xallinta dhibtaas iyo wanaajinta shaqadooda.



## Nidaamka Caalamiga Ah Ee Lagu Aqoonsado Tayada

Adduunyada hawl kasta oo la qabto iyo waxsoosaar kasta oo la sameeyaa waxa uu noqdaa mid tayadiisu sarrayso oo wax laga dheefo iyo mid tayo liidasho loogu khasaaro. Tayada meelaha ay muhiimka u tahay waxaa ka mid ah, nidaamka maamul ee hay'adda, ururka ama shirkadda, kuwaas oo markasta oo ay tayadooda maamul sarrayso ay u fududaato in ay gaadhaan yoolkooda.

Haddaba waxa ay is weydiintu tahay, ma jiraa hab lagu kalsoonaan karo oo lagu garto tayada maamul ama waxsaasaarka iyo adeegga. Waxsoosaarka ama adeegga iyo shaqada shirkadda, hay'adda iyo ururku marka ay yihiin kuwo caalamiya oo dadyow kala duwan gaadhaya, waxaa hubaal ah in ay adagtahay in lagu kalsoonaado cidda shahaado tayo siisay nidaamkaas maamul ama waxsoosaar, haddii aanay ciddaas qudheedu ahaayn mid lagu kalsoonyahay. Waxaa muhiim ah in la helo cid u dhexe oo kalsooni lagu qabi karo.

Haddaba, waxaa jirta hay'ad caalamiya oo soosaarta shahaadooyinka aqoonsi ee tayada waxsoosaarka, adeegga ama maamulka iyo Maaraynta arrimaha kala duwan. Waa hay'ad madaxbannaan oo la aasaasay sannadkii 1947 kii, xarunteeduna ay tahay magaalada Geneva ee Switzerland. Waa hay'adda caalamiga ah ee ilaalinta tayo wanaagga iyo bixinta aqoonsiga tayada oo magaceedu uu af Ingiriisi ku yahay "International Organization for Standardization" loona soo gaabiyo ISO. Waxaa xubno ka ah tobannaan ka mid ah hay'adaha dawladaha adduunka ee qaabilsan ilaalinta tayada noocyadeeda kala duwan.

Shirkadaha iyo hay'adaha ama dawladaha kala duwan ee adduunka ayaa ka codsada shahaadada aqoonsiga tayada waxsoosaarkooda ama adeegooda, ama xitaa nidaamkooda maamul. Kaddib iyada oo u eegaysa halbeeygo caalamiya oo u yaalla ayaa ciddii buuxisa ay shahaadada siisaa.

ISO in kasta oo ay madaxbannaantahay, haddana waa ay ka awood badantahay hay'ado badan oo dawlado u qaabilsan dhowrista tayada, kalsoonida lagu qabo shahaadada ay bixiso ayaana ka sarraysa. ISO waxa ay soo saartaa halbeeygo astaan u ah tayo wanaagga oo khuseeya waxsoosaarrada, adeegyada iyo maamulka. Dawladaha adduunka badankooda, iyo shirkadaha iyo hay'adaha caalamiga ah oo ka duulayaa halbeegyadaas iyo shuruudahaas ay soo saartayna waxa ay ku saleeyaan shuruucda iyo xeerarka dalalkooda iyo shaqooyinkoodu ku shaqaynayaan ee dhinaca la socoshada iyo ilaalinta tayada.

ISO halbeeg kasta oo ay dejiso waxa ay siisaa tirsi u gaar ah oo shahaadooyinka aqoonsiga loogu qoro, una ah sumad dadka kale ku gartaan in badeecaddaas, adeeggaas ama nidaamkaasi uu buuxiyey shuruuddii tayada ee caalamiga ahaa. Illaa hadda tirsiyada tayo ee ay xambaarsanyihiin shahaadooyinka ay bixisaa waxa

ay gaadhayaan 22,919 oo sumad u ah waxsoosaarro kala duwan, sida beero, dhismeyaal, farsamo gacmeed, iyo sida oo kale injineeriyadda dhismaha iyo makaanikada, iwm.

Marka tayada maamulka iyo Maaraynta la joogo, tirsigi ugu caansan ee ay ISO soo saartaa waa shahaadada caddaynta tayo wanaagga Nidaamka maamulka (A quality management system (QMS)), kaas oo ay siisay tirsiga ah ISO 9001. Shuruudaha iyo qodobbo la isla yaqaano ayaa u ah halbeeg ay ku qiimayso tayada maamul ee shirkadda ama hay'adda iyo nidaamkeeda maamul.

Tirsiyada ay ISO illaa hadda bixisay ee waxsoosaarka ama hay'adda lagu arko loo aqoonsanayo in ay tayadeedu sarrayso waxaa ugu caansan:

- ISO 9001: waa sumadda sarraynta tayada maamul.
- Halbeegga iyo shuruudaha ka horreeya aqoonsiga ee ay ISO ka rabto in ay hay'adda ama shirkaddu qaaddaa waa in la qiimeeyo;
- -heerka iyo sarraynta muhiimadda la siiyo macmiilka,
- heerka tayo wanaagga hoggaaminta,
- iskaashiga iyo wadajirka shaqaalaha,
- nidaamka shaqo wanaag, iyo
- joogtaynta sii wanaajinta iyo sii horumarinta shaqada, iwm.

Hoos ka akhri tirsiyada kale ee ISO halbeegga ugu ah tayo wanaagga, iyo mid kastaa waxa uu tilmaamayo: ISO 9001:2015 sumadda tayo wanaagga nidaamka Maamulka (QMS)

ISO 14001:2015 sumadda tayo wanaagga nidaamka maamul ee deegaanka (EMS)

ISO 45001:2018 sumadda tayo wanaagga shaqada iyo badqabka xirfadda caafimaadka (OH&S)

ISO 22301:2012 sumadda tayo wanaagga nidaamka joogtaynta maamul wanaagga iyo shaqada (BCMS)

ISO 27001:2013 sumadda tayo wanaagga nidaamka Maaraynta xogta ammaanka (ISMS)

ISO 31000:2018 sumadda tayo wanaagga Maaraynta khatartaha ganacsi

ISO 37001 2012 sumadda tayo wanaagga Maaraynta la-dagaallanka laaluushku

ISO 37301:2021 sumadda tayo wanaagga u hoggaansaananta shuruucda iyo nidaamyada dejisan

ISO 21001:2018 sumadda tayo wanaagga nidaamka maamul ee waxbarashada

ISO 10002:2018 sumadda tayo wanaagga habka qancinta macmiilka

ISO 10006:sumadda tayo wanaagga tayada mashaariicda.

ISO 15189:sumadda ku kalsoonaanta shaybaadhada caafimaadka.

ISO 17021:sumadda ku kalsoonaanta hay'adaha bixiya shahaadada aqoonsiga wanaagga maamul.



@africanreliefco



**Address:** Barbera Road - Hargisa

**Mobile:** +252633278256

**Phone:** +252514333

**Website:** [www.arcsom.org](http://www.arcsom.org)

